



GUDDIGA OHIO EE XUQUUQDA MADANIGA

Dhex-dhexaadinta iyo Xallinta Khilaafyada

Barnaamijka Dhex-dhexaadinta

Dhex-dhexaadintu waa hab aan rasmi ahayn oo u fududeeya dhinac saddexaad oo dhex-dhexaad ah in loogu yeero in uu caawiyo dhinacyada is haya si ay isku af-gartaan. Habkani wuxuu siiyaa labada dhinac nidaam aan qasab aheyn oo khilaafkooda lagu xaliyo.

Waa Maxay Sababta Loo Doorto Dhex-dhexaadinta?

Guddiga Ohio ee u dooda Xuquuqda Dadka, looguna yeero Ohio Civil Rights Commission (OCRC) barnaamijkiisa dhex-dhexaadinta waxaa la soo saaray sannadkii 1997. OCRC waxay awoodaan inay si guul leh u xaliyaan qiyaastii 85% dhammaan kiisaska loo maro dhexdhexaadinta.

- **Ka qaybgalka Mutadawucnimada** Dhammaan dhinacyada eedeeyntu quseyso waa in ay ku heshiiyaan in ay ka qayb qaadanayaan dib u heshiintooda si howsha loogu bilaabo.

- **Qarsoodi** Macluumaadka la bixiyo inta lagu jiro dhexdhexaadinta waxay noqon doonaan kuwo qarsoodi ah mana wadaagi doono.

- **Cadaalad Dhex-dhexaad ah** Dhex-dhexaadiyuhu wuxuu fududeeyaa isgaarsiinta oo cidna kuma qasbayo xallinta.

- **Badbaadi Waqti & Lacag** Ma jirto wax lacag ah oo adeegyada dhex-dhexaadintu qaataan. Isku dayid ayaa la sameeynayaa si loogu qabto dhex-dhexaadinta 45 casho gudahood.

Hanaanka Loo Maro Cabashada

Qof kasta oo dareensan inuu yahay dhibane lagu takoorayo jinsiyadiisa, midabkiisa, diintiisa, qoladiisa, asalkiisa, abtirsiyihiisa, naafanimadiisa, da'diisa, xaaladda qoyska (guriyeenta oo keliya) wuxuu cabasho u soo gudbin karaa cabasho rasmi ah Gudiga U Dooda Xaquuqda Reer Ohio.

Qofka ayaa sidoo kale soo gudbin kara cabashada ku saleysan aargoosi haddii ay aaminsan yihiin in looga aargoosanayo xaqa ay u leeyihiin in ay soo gudbiyaan dacwad ay ku didan yihiin takoorka lagu sameeyey.

Haddii nidaamka dhexdhexaadinta lagu guuleysan waayo ama haddii mid ka mid ah dhinacyada aanay rabin in ay ka qayb qaataan dhexdhexaadinta, kiiska waxaa loo gudbin doonaa qaybta baaritaanka. baaritaankaas oo loo marayo tallaabooyin taxane ah, kuwaas oo ay ka mid noqon karaan wareysiyada markhaatiga, codsiyada dokumeentiga iyo/ama booqashada goobta, Guddiga ayaana go'aamin doona inuu takoor dhacay ama inuusan dhicin.

Dhammaan adeegyada **waa lacag la'aan**, waxaana cabashooyinka looga xarayn karaa qof ahaan xafiiska OCRC ee magaaladaada, telefoonka ama bageena internetka ee (www.crc.ohio.gov). Cabashooyinka waa in lagu soo xereeyaa muddo lix bilood gudahood ah, laga bilaabo taariikhda uu

Xafiisyada Gobolka

Xafiiska Gobolka Akron
Ocacek Government Building
161 S. High St., Suite 205
Akron, OH 44308
330-643-3100
330-643-3120 (Fax)

Xafiiska Gobolka Cleveland
Lausche State Office Building
615 W. Superior Avenue
Suite 885
Cleveland, OH 44113
216-787-3150
216-787-4121 (Fax)

Xafiiska Gobolka Columbus
Rhodes State Office Tower
30 E. Broad St., 4th Floor
Columbus, OH 43215
614-466-5928
614-466-6250 (Fax)

Xafiiska Gobolka Dayton
Point West III
3055 Kettering Blvd, Suite 111
Dayton, OH 45439
937-285-6500
937-285-6606 (Fax)

Xafiiska Gobolka Toledo
One Government Center
640 Jackson St., Suite 936
Toledo, OH 43604
419-245-2900
419-245-2668 (Fax)

Xafiiska Dayax gacmeedka-
Cincinnati
Mid-Pointe Towers
7162 Reading Rd., Suite 1005
Cincinnati, OH 45237
513-351-2541
513-351-2616 (Fax)